

# Daaweynta COVID-19


## MA KHATAR BAA UGU JIRTAA QAADISTA COVID DARAN?

Daaweyn waa loo heli  
karaa si loo caawiyo dadka  
khatar sare ugu jira inay  
aad ugu xanuunsadaan.

# BARNAAMIJKA BAAR SI LAGU DAAWEEYO

Baar si lagu Daaweeyo waa barnaamij cusub oo caawin kara dadka in ay is baaraan oo si dhaqso leh ugu helaan daaweyn bilaash hadday qabaan COVID-19.

Ma jiro wax qarash ah xagga daaweynta ayadoo la eegeyn ceymis ama xaaladda sharci-haysasho.



# SHARUUDAHA U-QALMIDDA

Bixiyaha daryeelka caafimaadka ayaa kuu sheegi doona haddii aad u qalantid daawaynta ku haboon

- ✓ Heerka khatartaada qaadista COVID-19 oo daran
- ✓ Daawooyinka hadda la qaato
- ✓ Helitaanka daaweyn kale
- ✓ Da'da (waa inuu jiraa 12 sano ama ka weyn ugu yaraanna miisaanku yahay 88 pounds/40 kg)



# SIDEE U HELAA DAAWEYN?

- La hadal dhaqtarkaaga daryeel-caafimaadka marka koobaad. Dhaqtarkaaga wuxuu kuu qori karaa rajeeto laga buuxin karo meelkasta oo haysa daawooyinka feyraska jebiya.
- Haddii aadan lahayn dhaqtar caafimaad, isticmaal goob-sheegaha **Baar si lagu Daaweeyo** ([aspr.hhs.gov/TestToTreat](https://aspr.hhs.gov/TestToTreat)) si aad u heshid kiliinig/rug kuu dhaw ama wac 1-800-232-0233 (TTY 888-720-7489) caawimaad Ingiriis, Isbaanish iyo wax ka badan 150 afaf kale.
- U keen natiijada baaritaankaaga guriga (antigen) ama meel baaritaan goob Baar si lagu Daaweeyo.



**Waa maxay noocyada daawooyinka laga helo barnaamijka Baar si lagu Daaweeyo?**

Barnaamijka Baar si lagu Daaweeyo waxaa ku jira labo kaniini afka laga qaado oo feyraska jebiya - Pfizer's Paxlovid (Ritonovir-boosted Nirmatrelvir) iyo Merck's Lagevrio (Molnupiravir).



Daawooyinkaan waxay wax ka tari karaan ka hortagga xanuun daran iyo isbitaal-jiifin markii dhaqso la qaato markey calaamaduhu bilowdaan. Daawooyinka waa in la qaato 5 beri gudahooda markii calaamadaha COVID-19 bilowdaan.

# Q

**Sidee daawada afka ee feyraska jebisa u shaqeysaa?**

Daaweynta afka ee feyraska jebisa waxay caawin kartaa jirkaaga inuu la dagaalamo COVID-19 ayadoo ka joojineysa feyraska keena COVID-19 inuu ku sii tarmo jirkaaga, yareyneysa cadadka feyraska jirkaaga ku jira, ama caawineysa nidaamka jir-difaacaaga.

# A

## **Q** Waa maxay daawooyinka kale lagula tacaalo COVID ee la heli karo hadda?

Iyadoo aan hadda dawo lagu bixin barnaamijka Tijaabada caafimaadka, laakiin bukaanada difaaca jireedkooda liita waxaa laga yaabaa inay xaq u yeeshaan inay qaataan dawada (Evusheld) si ay uga caawiso kahortaga COVID.

# A

Weydii bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga haddii aad xaq u leedahay dawada (Evusheld), ama booqo bogga Birds Eye Medical.

[birdseyemedical.com/evusheld\\_treatments](https://birdseyemedical.com/evusheld_treatments)

# WAX BADAN KA BARO

Si aad macluumaad dheeraada uga ogaatid barnaamijka Baar si lagu Daaweeyo ama u heshid goob Baar si lagu Daaweeyo ee kuu dhaw, aad [aspr.hhs.gov/TestToTreat](https://aspr.hhs.gov/TestToTreat).

